# OGOOW XUQUUQYADAADA

## Xidhmada Agabka Shaqaalaha



Waxa maalgaliyay:

WES MARIAM ASSEFA FUND

fcss family & community support services

2025

Somali

**GACAN KA GAYSTAY:**

- Macluumaadka: Kooxda Xuquuqda Shaqaalaha, ActionDignity
- Naqshada: Helen Zhang, ActionDignity

**Xuquuqda Daabacaada:** Action Dignity Society (ActionDignity)

# Tusmada Macluumaadka


QIRAALKA/AQOONSASHADA DHULKA ........ 4

Barnaamijka Shaqaalaha BRAVE ........ 6

Xuquuqda Shaqaalaha Aasaasiga ah ........ 7

Xuquuqda Shaqaalaha Muhiimka ah ........ 8

Xuquuqda Aadanaha Alberta ........ 10

Heerarka Shaqaalaysiinta Alberta ........ 14

Golaha Magdhawga Shaqaalaha (WCB) ........ 16

Badbaadada iyo Caafimaadka Goobta Shaqada (OHS) ........ 17

Agabyo Caawimaada ee Alberta ........ 18

Liistada Barnaamijka ee ActionDignity ........ 24

Liistada Tixraaca ........ 26


Diidmada qaadista masuu'liyada: Waxaanu rabnaa inaanu xusno in macluumaadka lagu soo bandhigay dukumintigan aanay ahayn talo-bixin sharciyeed. Waxaanu rabnaa inaanu bixino macluumaad si aanu u kordhino fahanka xuquuqda shaqaalaha si kor loogu qaado bad-baadada iyo caafimaadka goobaha shaqada.

# Qiraalka/Aqoonsashada Dhulka

Aa'ga Calgary, halkaasoo wabiyada Bow iyo Elbow ay ku kulmaan, ayaa ah meel isku xidha halkaasoo wadaagista agabka, fikradaha, iyo fursadaha ay caadi ahaaan si wadajira isugu yimaadaan. Dadka dhaladka ah waxay leeyihiin magacyadooda u gaarka ah ee aa'gan kuwaasoo la adeegsanayay wax badan ka hor intii aanay soo-dagayaasha Scotish-ku aanay halkan ugu magac bixin Calgary. Luuqada Blackfoot waxay ugu yeedhaan, waxay halkan ugu yeedhaan, Moh-kins-tsis (moh-GIN'-stis ('g' fudud). Quruumihii Ugu horeeyay ee Îethka Nakoda Wîcastabi (ee-YETH'-kah nah-COH'-dah WHISK'-ah-tah- bay) waxay ugu yeedhaan aa'ga Calgary Wicispa Oyade (weh-CHIS'-spa oh-YAH'-day) dadka qaranka Tsuut'ina waxay ugu yeedhaan aa'gan Guts-ists-I (GOOT'-sis). Metis waxay aa'ga Calgary ugu yeedhaan Otos-kwunee (oh-TUSS' - kwanee).

Waxaanu jeclaan lahayn inaanu fursadan uga faa'idaysano inaan u mahadcelino una qirno inaanu soo ururinay aa'aga dhulka ee Blackfoot Confederacy, oo ka kooban quruumaha kooban ee Siksika (Seeg-see-kah), Piikani (Bee-gun-nee), Amskaapipiikani (Om-Skaa-bee-bee-Gun-nee) iyo Kainai (G-ai-nah); Î ethka Nakoda Wî castabi (ee- YETH'-kah nah-COH'-dah WHISK'-ah-tah-bay) Dadkii ugu Horeeyay, oo ka kooban Chiniki (Chin-ick-ee), Bearspaw, iyo Goodstone Quruumihii ugu Horeeyay; iyo Dadkii ugu Horeeyay ee Tsuut'ina. Magaalada Calgary ayaa sidoo kale ah hoyga goob taariikheedka Northwest Metis iyo Otipemisiwak (Oti-pe-MES-se-wa) Dawlada Métis, Métis Nation Battle River Territory (Nose Hill Métis District 5 and Elbow Métis District 6). Waxaanu aqoonsanay dhamaan dadka Dhaladka/Asalka ah ee ka dhigay Calgary gurigooda.

Isha xogta: Magaalada Calgary Qaab-dhismeedka Istaraatiijiyadda Ka-hortagga Cunsurinimada, 2023



# Barnaamijka Shaqaalaha BRAVE

(Rumeysnow Xuquuqda Iyo Qiimaha Shaqaalaha Lama-huraanka ah)

Faafitaanku wuxuu keenay in taxadir loo yeesho hab-dhaqamada iyo la kulmitaanada aan cadalada ahayn ee ay waajahaan shaqaalaha lama-huraanka ahi ee ka jira qaybo dhawr ah. Iyadoo laga jawaabayo sinaan laa'aantaas, waxaanu bilownay Oktoobar 2020 barnaamijka BRAVE Workers (Believe in the Rights And Value of Essential Workers). Barnaamijku waxa looga dan leeyahay xoojinta shaqaalaha muhiimka ah si loo sameeyo jawi shaqo oo ka bad-baado badan iyo in wax laga qabto caqabad-nidaamyada ay la kulmaan shaqaalaha muhiimka ah ee la takooray ee Cargil iyo xarumaha kale ee baakadeynta hilibka.

Dib-ugu-noqoshadeeda cusub, hadafka BRAVE Worker 2 waxaa loogu talagalay inay hogaanka u qabato isbadalo qaabeysan iyo nidaam saamayn leh, iyo sidoo kale caawimaada daryeelka caafimaadka ee gabi ahaanba Alberta. Waxaanu tan ku gaadhaynaa iyadoo kor loo qaadayo wacyigalinta dadwaynaha, dhisida awooda, iyo in iskaashi lala sameeyo kooxaha shaqaalaha ee ay khusayso, ururada iyo wakaaladaha dawlada. Dukumintigan waxa looga dan leeyahay in la sameeyo duni xor ka ah caqabada iyadoo shaqaalaha lagu wargalinayo xaqooda iyo in si firfircoon loogu ololeeyo dhaqan iyo ilaalin loo siman yahay.



# Xuquuqda Shaqaalaha Aasaasiga ah

Iyadoo hoos imanaysa Xeerka Shaqaalaha Kanada, dhamaan shaqaalaha jooga Kanada, oo ay ku jiraan Shaqaalaha Ajaanibta ah ee Ku meelgaadhka ah (TFWs), ayaa leh sadex xuquuqood oo aasaasi ah:

**1. Xaqa aay tahay inaad ogaato**
Waxaad leedahay xaqa inaad ogaato wixii ku saabsan khatarta shaqada iyo sidaad naftaada uga ilaalin karto

**2. Xaqa ka qayb-qaadashada**
waxaad xaq u leedahay inaad ka qayb-qaadato tababarka caafimaadka iyo bad-baadada, iyo inaad soo sheegto hadaad aragto hawlo aan ammaan ahayn.

**3. Xaqa inaad Diido**
Shaqada Aan-badbaadada lahayn Waxaad xaq u leedahay inaad diido shaqo aan lahayn badbaado oo adiga iyo saaxibaadaa khatar galin karta.

Iskaan garee ama Guji

Ma jeclaan lahayd inaad ogaato waxa ay tahay "Xaqa diidmada Shaqada Khatarta ah"?




# Xuquuqda Shaqaalaha Muhiimka ah

Kanada gudaheeda, waxa ku ilaalinaya sharciyada sidii ka shaqaale muhiima ahaan. Inaad ogaato xuquuqdaada iyo masuuliyadaha shaqaalaysiiyahaaga ayaa ah mid lagama maarmaan ah.

**Ka shaqaale ahaan, waxaad xaq u leedahay inaad:**

- Diido shaqada aad aaminsantay inaanay ammaan kuu ahayn adiga ama la-shaqeeyahaaga.
- Lagu siiyo lacagta shaqada aad qabato.
- Lagu siiyo lacagta ugu yaraan sadex saacadood oo shaqo, iyadoon loo eegayn inta saacadood ee aad shaqayso.
- Lagu siiyo tababar hadii aad u baahato mid si aad shaqadaada ugu qabsato si ammaan ah.
- Ku shaqayso jawi shaqo oo ka madax banaan dhibaatayn.
- Ku shaqayso goob-shaqo oo ka madax banaan takoorid.
- Haysato baasaaboorkaaga ama ogolaanshaha shaqada.
- Haysato goob shaqo oo bad-baado leh Ogaato wixii ku saabsan khataraha ama halisaha ka jira goobtaada shaqada.

**Maxay tahay inaad ka filato loo-shaqeeyahaaga?**
Waa masuu'liyada loo-shaqeeyahaaga in:

- Xiligeeda inuu kugu siiyo lacagta shaqada.
- Xaqiijiyo in goobtaadu shaqadu tahay mid ammaan ah.
- Bixiyo qalab kasta oo ilaalin ah oo loo baahanyay si aad u hesho badbaado xiliga shaqada lagu jiro.
- Ixtiraamo shuruudaha heshiis qoraaleedka.

**Shaqaaleeyaahaagu kuguma:**

- Qasbi karo inaad qabato shaqo aan laguu shaqaalaysiin ama aan laguu tababarin inaad qabato.
- Qasbi karo inaad shaqayso hadii aad xanuunsanayso ama dhaawacantay.
- Ma qaadan karo baasaaboorkaaga ama ogolaanshaha shaqada.
- Kaama masaafurin karo Kanada.
- Ma badali karo heerkaaga-xaalada socdaalka.
- Kaama dhigi karo inaad noqoto mid dib u bixiya kharashka lagugu shaqaalaysiiyay.



Xarunta CPLEA ee Barashada Sharciga Dadwaynaha Alberta- "10-ka Xuquuqood ee Shaqada ee Aanad Dhab ahaan U ogayn ee aad Ku haysato Alberta"

[Iskaan garee ama Guji ](#)




# Xuquuqda Aadanaha Alberta

Xeerka Xuquuqda Aadanaha wuxuu xaqiijinayaa in qof kasta oo jooga Alberta uu leeyahay xaqa ka xor noqoshada takoorida iyo dhibaateynta goobaha gaarka ah ee la ilaaliyay iyo ku salaysnaanta, oo ay ku jiraan:

- Da'da
- Asalka uu ka soo jeedo
- Dabaqada
- Midabka
- Heerka-xaalada Qoyska
- Jinsiga
- Muujinta Jinsiga
- Aqoonsashada Jinsiga
- Heerka-xaalada Guurka
- Naafonimada Maskaxda
- Naafonimada Jidh ahaaneed
- Goobta Asalka ah
- Isirka
- Diinta uu Aaminsanyahay
- Qaabka Galmada
- Isha Dakhliga


Waxa laga yaabaa inaad dareemayso in si xun laguula dhaqmay iyadoo lagu saleeyay hal ama ka badan ee sababaha la ilaaliyey ee hoos ku taxan. Xaaladaas gudaheeda, waxa laga yaabaa inaad la kulmayso takoor ama dhibaatay. Dhaqankan aan fiicnaynayni wuxuu u eekaan karaa afxumo ama hab-dhaqano aan fiicnayn kuwaasoo ah hadal, qoraal, jidh-ahaan, ama maqal-muuqaal. Sida Hoos timaada Xeerka Xuquuqda Aadanaha Alberta, hab-dhaqankan ayaa si xoog leh loo mamnuucay. Komishanka Xuquuqda Aadanaha ee Alberta shaqadiisa ugu muhiimsani waa ilaalinta xuquuqda shaqaalaha Alberta. Qof kasta oo ku nool ama ka shaqeeya Alberta kaasoo la kulmay hab-dhaqan ka soo horjeeda aa'ga la ilaaliyay ee gaarka ah ama sababaha ayaa haysta 12 bilood inuu ku xareeyo cabasho Komishanka Xuquuqda Aadanaha ee Alberta. Dhamaan shaqaalaha ku sugan Kanada ayaa lagu ilaaliyay Sharciga Federaalka. Kanada waxay u qaadanaysaa xumeynta shaqaalaha ajaanibta ee ku meel gaadhka ah (TFW) si dhab ah. Loo-shaqeeyayaasha xumeeya shaqaalaha ku meel gaadhka ah ee ajaanibta ah ayaa waajihi kara ganaax ama waxa laga xanibi karaa barnaamijka TFW.



# Soo-sheegida/Ka soo warbixinta

## Arimaha loo baahanyay in la ogaado marka la samaynayo Kasoo warbixin/Soo sheegid

- Waxa muhiim ah inaad bixiso macluumaadka ugu badan ee aad awoodo.
- Macluumaadka aad bixiso waxa lagu ilaaliyey xeerarka dhawrida xogta gaarka ah ee Kanada.
- Ma aha inaad bixiso magacaaga, lambarka taleefankaaga ama Qiimeynta Saameynta Suuqa (LMIA) iyo lambarka ruqsada shaqada si aad u sameyso warbxin.
- Lagulamasoo xidhiidhayo ama lalama wadaagayo macluumaadkaaga iyadoon la hayn ogolaanshahaaga.
- Sababo shakhsi ahaaneed awgeed, kuuma sheegi karaan wixii ku saabsan heerka-xaalada ee warbixinta.




Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah:

albertahumanrights.ab.ca

Youtube-ka @albertahumanrights

Akhri xeerka AHR

## Macluumaadka aad u baahantay si aad u samayso warbixin

- Magaca, Cinwaanka, iyo lambarka taleefanka ee ganacsiga ama ururka.
- Magaca(yada) ama jagada-shaqada(jagooyinka shaqada) ee dadka ku lugta leh.
- Waxa uu yahay ama nooca xadgudubka.

## Habab kale oo loo soo sheego ama looga soo warbixiyo xadgudubka

- Taleefan ahaan
- Shakhsi ahaan
- Boosto ahaan

## Si aad u xarayso cabasho ama ula soo xidhiidho:

- Laynka Waydiinta ee Qarsoodiga ah 780-427-7661
- Iimaylka: humanrights@gov.ab.ca

Adeeg bilaasha ayaad ka helaysaa Xarunta Agabka Shaqaalaha
hadii aad u baahato wax caawimaad ah oo ku saabsan nidaamka:
Taleefanka: 403-264-8100
Iimaylka: info@helpwrc.org

**Ma Rabta inaa ogaato hadii waxa aad la kulmaysaa ay hoos imanayaan Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Alberta? Hubi liinkiga/xidhiidhiyaha si aad u baadho.**

Iskaan garee ama Guji

# Heerarka Shaqaalaysiinta Alberta

Halbeegyada shaqaaleynta waa heerarka ugu hooseeya ee shaqaaleysiinta si loo ilaaliyo shaqaalaha. Xeerka Halbeegyada Shaqaaleysiinta Alberta ayaa hoosta ka xariiqaya xuquuqda iyo masuu'liyadaha loo-shaqeeyaha iyo shaqaalaha ee dhinacyada sida bixinta mushaarka, saacadaha shaqada, wakhtiga dheeraadka ah, fasaxyada, fasaxyada guud, fasax qaadashada, soo gaba-gabaynta shaqaalaysiinta iyo in kaloo badan. Hadii aad u malaynayso in qofka aad u shaqeynaysaa aanu raacayn xeerka, waxaad xarayn kartaa cabasho mudada shaqaaleynta gudaheeda ama ilaa 6 bilood gudahood taariikhda ugu danbeysa ee shaqaaleynta.

## Si aad u xarayso cabasho:

- Wac 780-427-3731 (Edmonton) ama Laynka bilaashka ah 1-877-427-3731.
- Hadii aad dhagoole tahay, si fiican aanad wax u maqlin ama aanad hadli karin, wac TTY 780-427-9999 ama Toll-free TTY ee 1-800-232-7215.

Adeeg bilaash ah ayaa laga heli karaa Xarunta Agabka Shaqaalaha hadii aad u baahato wax caawimaada oo ku aadan habka ama nidaamka:

- Taleefanka: 403-264-8100
- Iimaylka: info@helpwrc.org

**Waxyaabaha aad la kulmaysaa ma hoos imanayaan Halbeegyada Shaqaaleynta? Adeegso Is-qiimeynta Halbeegyada Shaqaaleynta si aad u ogaato.**

Iskaan garee ama Guji si aad u saxdo



Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah:

[Bogga rasmiga ah ee Heerarka Shaqo ee Alberta]

[Akhri Xeerka Heerarka Shaqada ee Alberta]

# Gudiga Magdhowga Shaqaalaha (WCB)

Gudiga Magdhowga Shaqaalaha (WCB) waxay fulisaa shaqooyinka Xeerka Magdhowga Shaqaalaha. Xeerku wuxuu xusayaa sida barnaamijku u shaqayn doono. Shaqaalaha u qalma ee aan shaqayn karin sababo dhaawac ama jirro ka soo gaadhay shaqada ayaa heli kara taageero. Faa'idooyinka waxa ku jira laakiin aan ku xadidneyn magdhowga mushaarka luma, daryeelka caafimaadka, iyo dib u dhaqan celinta.

**Waa maxay talaabooyinka la qaadayo marka aad ku dhaawacanto shaqada?**

Isla markiiba marka ay dhacdadu dhacdo, u loo-shaqeeyahaaga iyo/ama kormeerayaasha, xataa hadii aad u malaynayso in dhaawacu fudud yahay. Fadlan iyaga u sheeg faah-faahinta waxa dhacay. Shaqaaleysiiyahaaga ayaa mas'uul ka ah inuu soo wargalinta WCB hadii dhaawaca kusoo gaadhay u baahan yahay wax ka badan gargaarka koowaad ama hadii dhaawucu kaa hor istaagayo sii wadashada shaqadaada.
Waxaad waydiin kartaa qofka aad u shaqaynayso Warbixinta WCB ee foomka dhaawaca ama helitaanka xafiiska WCB ama websaydkooda. Waa muhiim in foomamka la dhamaystiro. Waxaad xaq u leedahay nuqulka/koobiga warbixintooda ee diiwaankaaga. Sida ugu horeysa ee WCB u hesho macluumaadka, ayay sida ugu dhakhsaha badan go'aan uga gaadhi doonaan faa'idooyinka iyo adeegyada aad xaqa u leedahay. Hel gargaarka koowaad oo arag dhakhtar hadii loo baahdo.
Hadii aad la kulanto dhakhtar, u sheeg dhakhtarka sababaha booqashadaada oo qeex/tilmaan dhaawacyadaada iyo astaamaha.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah
https://www.wcb.ab.ca;
Ku xidhnow wakiilka WCB taleefoon bilaash ah 1-866-922-9221, ama kala xiriir imaylka contactcentre@wcb.ab.ca.

# Badbaadada iyo Caafimaadka Shaqada (OHS)

Xeerka Badbaadada iyo Caafimaadka goobta Shaqada, ayaa dhigaya heerarka ugu hooseeya ee bad-qabka iyo bad-baadada dhamaan shaqaalaha si loo yareeyo khataraha shaqada ee keeni kara waxyeelo, jirro/xanuun iyo dhimasho. OHS waxay ayaa rabitaankeedu yahay horumarinta jawiga iyo xaaladaha shaqada ee dhamaan shaqaalaha, taasoo lagu gaadhayo iyadoo hoosta laga xariiqayo masuu'liyadaha shaqaalaha iyo loo-shaqeeyayaasha.

## Si aad u xarayso cabasho ama ula soo xidhiidho:

- Wac 780-415-8690 (Edmonton) ama laynka bilaashka ah 1-866-415-8690
- Hadii aad dhagool tahay, si fiican aanad wax u maqlin ama hadalku ku dhibayo, wac TTY: 780-427-9999 (Edmonton) ama laynka bilaashka ah TTY: 1-800-232-7215.

Adeeg lacag la'aan ah ayaa laga heli karaa Xarunta Agabka Shaqaaah hadii aad wax caawimo ah uga baahato nidaamka/habka:
Taleefanka: 403-264-8100
Iimaylka: info@helpwrc.org

**Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah:**

Mareegta rasmiga ah ee OHS

Sharciga Badbaadada iyo Caafimaadka Shaqada

Xeerka Badbaadada iyo Caafimaadka Shaqada

**Ma rabtaa inaad ogaato farqiga u dhexeeya warshadaha beeraha?**

Iskaan garee ama Guji

# Agabyo Caawimaada ee Alberta

**La-talin Sharciyeed & Macluumaadka, Xuquuqda aadanaha, Heerarka Shaqaaleysiinta, Qorshaha Hawlgabka-Naafada Kanada**

Xarunta Baadhista Xoriyada Rayidka/Madaniga ah ee Alberta (ACLRC)
Xarunta Baadhista Xoriyada Rayidka ee Alberta (ACLRC) Ayaa bixiya macluumaad guud oo xaqiiqo ah oo ku aadan habraacyada sharciga iyo xeerarka.
Taleefanka: 403-220-2505
www.aclrc.com

Macluumaad dheeraad ah

Xarunta Macluumaadka Shaqaalaha (WRC)
Xarunta Macluumaadka Shaqaalaha (WRC) waa urur aan faa'ido doon ahayn oo taageero lacag la'aan ah siiya Shaqaalaha Alberta. WRC waxay caawisaa wax kastoo la xidhiidha shaqaalaysiinta iyadoo loo marayo Barnaamijka Kiis-hawleedka iyo Waxbarashada Sharciga Dadwaynaha. WRC waxay taageertaa dhinacyada Heerarka Shaqaalaysiinta, Caymiska Shaqaalaysiinta(EI), Xuquuqda Aadanaha, Waxyeelooyinka Galmada, Qorshaha-Naafonimada Hawlgabka Kanada (CPP-D), Caymiska Naafada, Dhaawaca Goobta-shaqada iyo Dakhliga Alberta ee sida Daran u Curyaamay (AISH).

Macluumaad dheeraada, la xidhiidh 403-264-8100, ama iimayl: info@helpwrc.org
www.helpwrc.org

Macluumaad dheeraad ah

Migrantè Alberta
Migrante Alberta waa urur aan faa'ido doon ahayn iyo ururka u-doodista is-caawinta oo shaqaalaha la takooray ka caawiya arimahooda iyagoo u sameeya u gudbino, u doodis iyo u ololeyn.
Taleefanka: 403-392-9900
www.migrantealberta.ca

Macluumaad dheeraad ah

**Ururka Shaqaalaha**

The United Food & Commercial Workers Union, Local 401 (UFCW Local 401)

UFCW Local 401 waxay u qaadataa wax weyn teeda lagu faani karo ee xubin ka noqoshada kala duwan, oo ka kooban ku dhawaan ku dhawaad 32000 oo shakhsi oo ku kala sugan guud ahaan Alberta. Laynka-taleefanka bilaashka ah ee cunnada iyo wakiilada ururada: 1-800-252 7975
https://gounion.ca/employer/cargill-foods

Macluumaad dheeraad ah

Barnaamijka Taageerada Xidhiidhka Shaqada Shaqaalaha

Barnaamijka Employee Labour Relations Support Program waa qalab cusub oo loogu talagalay ururada shaqaalaha ama kuwa dhawaan noqon doona ururo si ay si fiican ugu fahmaan xuquuqahodoa iyo masuu'liyadaha hoos imanaya xeerarka shaqaalaha ee Alberta.
Taleefan:780-644-2583 (Aa'ga Edmonton)
ama Taleefanka
Bilaashka ah 1-833-644-2583.

Macluumaad dheeraad ah .

**Dhaqaale ahaan, Raadinta Shaqada, Hoy/Guri La'aanta**

Alberta Supports

Alberta Supports waxay gacan ka gaysataa helitaanka in ka badan 30 barnaamij iyo 120 adeegyo ah oo loogu talagalay dadka waaweyn, dadka naafada ah, shaqo doonayaasha, waalidka iyo qoysaska, iyo guri la'aanta. Taageerada dhaqaalaha ayaa lagu heli karaa in ka badan 100 luqadood.
Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo: www.alberta.ca/alberta-supports

Macluumaad dheeraad ah

Warsidaha Calgary iyo Aa'aga Shaqaaleysiinta

Warsidaha Calgary iyo Aa'ga Shaqaaleysiinta ayaa loo cusboonaysiiyaa si todobaadle ah maalmaha Jimcaha waxaana diyaariya Dawlada Alberta. Warsiduhu wuxuu bixiyaa macluumaadka xirfadaha lacag la'aanta ah iyo macluumaadka shaqaaleysiinta, sida aqoon iswaydaarsiyada, kulamada, iyo barnaamijyada gudaha iyo hareeraha Calgary.

Macluumaad dheeraad ah

# Agabyo Caawimaada ee Alberta

### Shaqaalaha Ajaanibta ah ee Ku meel gaadhka ah

Xafiiska La-talinta (TFW) Shaqaalaha Ajaanibta Ku meelgaadhka ah ee Alberta
Xafiiska La-talinta (TFW) Shaqaalaha Ajaanibta Ku meelgaadhka ah ee Alberta ayaa si ku meel gaadha u caawiya shaqaalaha ajaanibta ah iyo ardayda ajaanibta ah ee haysta ogolaanshaha shaqada si loogu helo xalal, macluumaad iyo agabyo.
Taleefanka: 1-877-944 9955
Iimaylka: lbr.tfwao@gov.ab.ca

Macluumaad dheeraad ah

Shaqaalaha Ajaanibta Ku meelgaadhka ah: Xuquuqdaada waa la Ilaaliyay
Dawlada Kanada ayaa diyaarisay hagahan una turjuntay 9 luuqadood. Waxa loogu tala galay qof kasta oo shaqeeya oo hoos imanaya Barnaamijka Shaqaalaha Ajaanibta Ku meelgaadhka ah (TFWP) sidii buug-gacmeed ahaan ama xalinta dhibaatooyinka.

Warbixinta Xadgudubka Goobta-shaqada

Macluumaad dheeraad ah

### Warbixinta Xadgudubka Goobta-shaqada

Service Canada (Adeegga Kanada)
Hadii adiga ama qof kale oo aad garanayso uu la kulmayo xadgudubta goobta-shaqada, la xidhiidh laynka qarsoodiga ah ee Service Canada: 1-866-602-9448.
1-866-602-9448

### Shaqaalaha aan sharciga lahayn

Xarunta Shaqaalaha ee Sudbury

Cilmi-baarista Machadka Parkland Warbixinta: Ku noolaanshaha iyo Ka shaqaynta xaalad la'aan Alberta iyadoo aan

**Deegaameynta, Dadka cusub ee yimid, Soo-galootiga, Qaxoontiga**

Xarunta Imaadayaasha Cusub (CFN)
CFN waxay ka caawisaa soo-galootiga iyo qaxoontiga inay dagaan oo la qabsadaan Calgary iyagoo ka caawiya shaqaalaysiinta, luuqada, iyo Barnaamijyada dhalinyarada.
Taleefanka: 403-569-3325
www.centrefornewcomers.ca
Macluumaad dheeraad ah

Bulshada Waxbarashada Soo-galootiga (TIES)
TIES waa urur aan faa'ido doon ahayn oo bixiya fasalada luuqada Ingiriisiga, xirfadaha shaqaaleysiinta, adeegyada deegamaynta, iyo kuwo kaloo badan waxaanay adeegyada siiyaan imaadayaasha cusub iyo Kanadiyaanka dakhligoodu hooseeyo ee jooga
Taleefanka: 403-235-3666
www.immigrant-education.ca
Macluumaad dheeraad ah

Calgary Aasaaska Buuxinta Buundada ee Dhalinta (CBFY)
CBFY waxay ka taageertaa soo-galootiga iyo dhalinta qaxoontiga iyo qoysaskooda dhanka aqoonta iyo macluumaadka ku saabsan dhaqanka Kanadiyaanka iyo nidaamka dugsiyada.
Taleefanka: 403-230-7745
www.cbfy.ca
Macluumaad dheeraad ah

Calgary Bulshada Soo-galootiga Kaatooliga (CCIS)
CCIS waxay u taagantay astaan taageero ee dhamaan dadka ku cusub Calgary iyo Koonfurta Alberta, iyagoo bixinaya soo dhawayn iyo jawi xoojinaya halkaasoo shakhsi kasta, iyadoon loo eegayn asalkooda ay ka soo jeedaan, la siiyo fursada inay ku sahamiyaan adkaanshaha dagida dal cusub si kalsooni iyo u adkaysi leh.
Taleefanka: 403-262-2006
www.ccisab.ca
Macluumaad dheeraad ah

# Agabyo Caawimaada ee Alberta

**Deegaameynta, Dadka cusub ee yimid, Soo-galootiga, Qaxoontiga**

Ururka Haweenka Soo-galootiga ah ee Calgary (CIWA)
CIWA waxay bixisaa in ka badan 50 barnaamij kuwaasoo taageera soo-galootiga iyo haweenka iyo caruurta qaxoontiga ah iyo qoysaskooda. Waxay sidoo kale bixisaa tababarada shaqaaleynta.
Taleefanka: 403-263-4414
www.ciwa-online.com

Macluumaad dheeraad ah

**Caafimaadka iyo Fayoobida Maskaxda**

Xarunta Distress Centre ee Calgary
Xarunta Distress waxay bixisaa la talinta walaaca qarsoodiga ah oo lacag la'aan ah, taageerada asaaga dhalinyarada, iyo sahaminta iyo u-gudbinada, iyadoo loo marayo 211. Waxay leedahay laynka wicitaan oo 24 saacadood ah.
Taleefanka: 403-266-4357
www.distresscentre.com

Macluumaad dheeraad ah

**Adeegyada Haweenka**

Xarunta Haweenka ee Calgary
Xarunta haweenka ee Calgary waxay bixisaa fursadaha haweenka ee helitaanka iyo bixitaanka taageerada labadaba, ku xidha kuwa kale iyo dhisida bulshada oo loo marayo barnaamijyo kala duwan.
Taleefanka: 403-264-1155
www.womenscentrecalgary.org

Macluumaad dheeraad ah

**Agabka Bulshada**

Wac 211
211 waa layn caawin oo loogu talagalay bulshada iyo adeegyada ummada ee jooga Alberta. Waa adeegyo la heli karo 24/7.

# NOLASHA FIICAN EE ALBERTA WAXAY KA BILAABATAA SHAQO CADDALAD AH



II ISKAAN GAREE

**KU BIIR URURKA SHAQAALAHA EE UGU WEYN SEKTARKA GAARKA AH EE ALBERTA. IN KA BADAN 32,000 XUBNOOD OO ISKU TASHADAY.**

UFCW local 401 A VOICE FOR WORKING ALBERTA

# Liistada Barnaamijka ee ActionDignity

Action Dignity Society (ActionDignity) waa urur bulshadu saldhig u tahay kaasoo ka shaqeeya inuu kor u qaado codadka dhaqan-qowmiyadeedka bulshooyinka jooga Calgary. Waxay hirgalisaa barnaamijyo kala duwan oo loo maro wada-sheekaysiyada bulshada, tababarida, kulanada, cilmi-baadhis bulshada ku salaysan, iyo badalaada nidaamyada iyo u doodista xeer-nidaamyada.
Taleefanka: 403-263-9900.
Mareegta: https://actiondignity.org

Macluumaad dheeraad ah



Barnaamijka Xuquuqda Shaqaalaha ayaa si wayn ugu dadaal xoojinta shaqaalaha lama-huraanka ah ee ka soo jeeda qowmiyadaha la takooro ee jog qaybaha baakadeynta hilibka iyo daryeelka caafimaadka si ay u helaa ammaan iyo jawi-deegaaneed shaqo oo leh lacag bixin u qalanta.
Hadafkan ayaa lagu ogaadaa ka-qaybgalinta bulshad iyo cilmi baadhida talaabooyinka ka qayb-qaadashada, kuwaasoo lagu ogaado badalaad-nidaameedka iyo u doodista dib-u-habeynta xeerarka.



Barnaamijka Badalida Nidaamyada Caafimaadka Maskaxda ayaa loogu talagalay in lagu horumariyo helitaanka caafimaadka maskaxd ee bulshooyinka la takooray iyadoo loo marayo wax ka badalida hab-nidaameedka.
Waxay ka shaqaysaa ka qaybgalinta iskaashiga iy talaabooyinka ee bulshooyinka la takooro, ma aha faa'idooyinka iyo lamaanayaasha si loo wanaajyo helitaanka adeega iyadoo wax laga qabanayo sababaha saldhiga u ah arimah caafimaadka maskaxda ee ka jira xeerarka, dhaqamada iyo aaminsanaanta.



Barnaamijka Badbaadada Dadwaynaha ayaa lagu kobciya xidhiidhada tageerada bartilmaameedka ee ka dhex jira bulshooyinka la takooro iyo hoos u dhigida saameynada takoorka iyo cunsiriyada. Hindisahan ayaa la gaadhay iyadoo la balaadhiya iskaashiyadeena hore u jiray ee lala leeyaha ururada bulshooyinka isku dhaqanka ah si loo kobciyo aragtida sinaan iyo takoor la'aan ee hay'adaha gudahooda.

Barnaamijka Sinnaanta Jinsiga waxa uu bartilmaameedsadaa si kor loogu qaado xiriirka wanaagsan ee jinsiga iyo horumarinta natiijooyinka caafimaadka. Tan waxaa lagu gaaraa iyada oo lala kaashanayo ururada haweenka dhaqamada qawmiyadaha si loo xoojiyo hindisayaasha iyo qaabdhismeedka sinnaanta jinsiga. Intaa waxaa dheer, barnaamijku waxa uu ragga iyo wiilasha ka hawlgeliyaa dadaallada ku aaddan sinnaanta jinsiga iyada oo la xoojinayo saaxiibada iyo taageerada beesha si ay u aqoonsadaan, wax uga qabtaan, oo ay u gudbiyaan tusaalooyinka rabshadaha qoyska, iyada oo ay wehelis kobcinta doodaha isbeddelka ee jinsig ee ragga iyo wiilasha.

Barnaamijka ka mid noqoshada bulshada iyo dhaqaalaha waa in la dammaanad qaado fursadaha caddaaladda ah iyo xoojint dhammaan shakhsiyaadka si ay si buuxda uga qaybgalaan sidii muwaadiniin firfircoon. Habka iyo istiraatijiyadda fulinta waxa ka mid ah samaynta bay'ad nabdoon oo dadk ku xidhmaan, ku beeraan, oo ay fuliyaan qorshayaal hawleed ay bulshadu waddo oo ku saabsan mudnaanta la aqoonsaday. Intaa waxaa dheer, waxay diiradda saartaa horumarinta xirfadaha iyo awoodaha hoggaamiyeyaasha iyo xubnaha bulshada ee dhaqan ahaan kala duwan.

Platform-ka GrOW (Grassroot Organizational Empowerment (Ururka Xoojinta Grassroot) Hindisaha waa hab wax-ka-beddelka waxbarashada iyo ka-qaybgalka kaas oo awood siinaya ururrada asaasiga ah inay iskaashi sameeyaan, qaadaan tallaabo-wadareed, dhisaan xirfadaha xubnahooda, oo ay horumariyaan awoodahooda urureed, tani waxay ka caawisaa inay wax ka qabtaan caqabadaha waara oo ay si wax ku ool ah wax uga qabtaan arrimaha bulshada.

# Liistada Tixraaca


Alberta Xuquuqda Aadanaha -
https://albertahumanrights.ab.ca/

10-ka Xuquuqood ee shaqada ee Aanad dhab ahaan Ogayn ee Aad ku leedahay Alberta -
https://www.cplea.ca/rightsatwork/10-rights-you-probably-didnt-know/

Xarunta Kanadiyaanka ee Caafimaadka Shaqada iyo Bad-baadada - https://www.ccohs.ca/

Frontiers - https://www.frontiersin.org/

Shaqaale Ajaanib ah oo ku meel gaadh ah: Hagaha Shaqaalaha - https://actims.ca/wp-content/uploads/2020/08/GuideforEmployees-25.pdf

Shaqaalaha Ajaanibta Ku meelgaadhka ah: Xuquuqdaada waa la ilaaliyaa -
https://www.canada.ca/en/employment-social-development/services/foreign-workers/protected-rights.html#h2.2'




915 33 St NE
Calgary, AB T2A 6T2

Taleefanka: 403 263 9900
Fakiska: 403 262 8973

www.actiondignity.org
info@actiondignity.org

@ActionDignity